Itaalia

MINISTERO DELL'INTERNO

EUAA EUROPEAN UNION AGENCY FOR ASYLUM

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad kayar tahay da'da 18 sano jir
- aad la imaatay mid ama labadaada waalidba
- adiga iyo qoyskaaga aad codsateen magangelyo (oo sidoo kale loo yaqaan ilaalin caalami ah) […itaalia]

SOMALI


# TUSMADA


| | |
|---|---|
| Adiga iyo qoyskaaguba waxaad ku badqabtaan wadankan | 3 |
| Yaa ku caawin kara? | 3 |
| Maxaad adiga iyo qoyskaagu heli doontaan? | 4 |
| Xuquuqda helitaanka daryeelka caafimaad | 6 |
| Wargali shaqaalaha | 7 |
| Waa maxay qiimeynta waxa ugu wanaagsan ee laguu qaban karo? | 8 |
| Xuquuqda waxbarasho | 8 |
| Xuquuqda shaqo | 9 |
| Waraaqahaaga magangelyo-doonka | 9 |
| Halkee ayaad adiga iyo qoyskaaguba joogi doontaan? | 10 |
| Maxaad samayn kartaa haddii qof si xun kuula dhaqmo? | 11 |
| Waa maxay waajibaadka adiga iyo qoyskaagu la idinka rabo markaad heshaan soo dhawayn? | 12 |
| Maxaa dhacaya haddii adiga iyo qoyskaagu aydin u hogaansami waydaan waajibaadyadiinna? | 13 |
| Xeerarka ku saabsan codsashada imagangelyada caalamiga ah iyo u safridawaddamada EU+ | 14 |
| MAXAA DHACAYA HADDII ADIGA IYO QOYSKAAGA AAD U BAXSATAAN MID KA MID AH WADDAMADA KALE? | 15 |
| Yaa idin caawin kara adiga iyo qoyskaaga haddii aydaan ku qanacsanayn go'aan ay gaareen maamulka? | 16 |
| Maxaa dhaca haddii qaar ka mid ah taageerada la beddelo? | 16 |
| Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo | 17 |

## ADIGA IYO QOYSKAAGUBA WAAD KU BADQABTAAN wadankaN

Adiga iyo qoyskaaga waxaad u sheegteen maamulka in aadan dib ugu laaban karin waddankiinna sababtoo ah waxaad gali kartaan khatar, isla markaana waxaad codsateen magangelyo. Adiga iyo qoyskaaguba waxaad magangeliyo doon kutihiin Itaalia.

## YAA KU CAAWIN KARA?



Yurub gudaheeda, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay carruur, wuxuuna xaq u leeyahay in la siiyo **taageero gaar ah**.

Intaad ku sugan tahay wadanka, shaqaalahan soo socda ayaa ku caawin kara, tusaale ahaan:

- **Shaqaalaha bulshada** wuxuu kaa caawin doonaa adiga iyo qoyskaaga baahiyihiina maalinlaha ah ama wuxuu la xidhiidhi doontaa shaqaale kale oo kaa caawin kara dhibaato gaar ah.
- **Dhakhtar** ama **kalkaaliye** wuxuu ku caawin doonaa haddii aad dareento xanuun, aad dhaawacanto ama aad u baahan tahay nooc kasta oo kaalmo caafimaad ah.
- **Dhakhtarka maanka** wuxuu kaa caawin doonaa haddii aad dareento murugo, cadho, baqasho, welwel ama ay kugu adkaato hurdada.
- **Lataliye sharci** wuxuu kaa caawin doonaa adiga iyo qoyskaaga inaad fahamtaan waxa dhici kara inta lagu jiro habraaca magangalyada iyo haddii aad rumaysan tahay in xuquuqdaada aan la ixtiraamin.
- **Turjumaan** wuxuu kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqada aad fahmayso. Doorkoodu waxa weeye iney si sax u turjumaan waxa aad adiga ama dadka kale dhahdaan.


Miyay ku haystaan wax dhibaatooyin ah? Waxaad had iyo jeer weydiin kartaa shaqaalaha caawimo ama taageero haddaaad u baahato. Ha cabsan, dhibaatooyinka waa lawada xallin karaa.

# MAXAAD ADIGA IYO QOYSKAAGU HELI DOONTAAN?

Adiga iyo qoyskaagu waxaad heli doontaan noocyo kala duwan oo taageero iyo adeegyo ah intaad sugaysaan inta maamulku baadhayo codsigiinna magangelyo. Tan waxa la dhahaa **soo dhawayn**.

Ka ilmo ahaan iyo magangalyo doone ahaanba, waxaad leedahay xuquuqo laakiin sidoo kale waxa jira waajibaad ku saaran oo ay tahay inaad ixtiraamto. Kuwan waxa lagu sharaxay buug-yarahan.

Haddii aanad fahmayn qaybaha buug-yarahan ama haddii aad qabto wax su'aal ah, weydii shaqaalaha xaruunta soo dhoweenta iyo waalidkaagaba.



Inta aad ku sugan tihiin dalkaan, shaqaaluhu waxay idiin siin doonaan macluumaad dheeri ah iyadoo la eegayo xaaladdiinna. Waxaad weydiin kartaan su'aalo wakhti kasta.

**Iyadoo la eegayo xaaladiina, adiga iyo qoyskaagu waxaad heli doontaan:**



- goob aad seexataan



- cunto



- dhar



- agabka nadaafada gaarka ah



- Adiga iyo qoyskaagu waxaa laga yaabaa inaad sidoo kale heshaan lacag aad u isticmaashaan kharashaadka maalinlaha ah.

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

**Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay.**

**Waxaad u sheegi kartaa qoyskaaga iyo shaqaalaha wixii dhibaato caafimaad ah ee aad qabto.** Waxay kaa caawin karaan inaad aragto dhakhtar ama kalkaaliye haddii aad u baahan tahay.



Haddii dhakhtarku u arko inay lagama maarmaan tahay, wuxuu qori doonaa daawooyin iyo sidoo kale booqashooyin aad ku arki karto dhakhaatiirta takhasuska gaarka ah u leh.

Shaqaaluhu waxay kuu sheegi doonaan adiga iyo qoyskaaga haddii laga yaaboinaad  raadsato baadhis caafimaad oo uu sameeyo dhakhtar ama kalkaaliye.

Waxa laga yaabaainaad  hubinta caafimaadkaaga oo ay ku siiyaan kaalmada daruuriga ah ee aad u baahan tahay.


Haddii aad la kulanto xaalad caafimaad oo u baahan gargaar degdeg ah ama dhaawac u baahan daaweyn degdeg ah, u sheeg waalidkaa ama shaqaalaha. Haddii aad ku sugan tahay meel ka baxsan halkaad ku noolayd, waxaad wici kartaa lambarka gargaarka degdega ah 112.

## WARGALI SHAQAALAHAAGA HADDII:





- aad dareemayso xanuun, dhaawacantay ama aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdega ah ama daaweyn
- aad isticmaasho daroogo ama aad cabto maandooriye
- aad horey u soo martay dhibaato ama xadgudub, ama aad hadda la kulmeyso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- aadan kaligaa socon karin, ama aad dhibaato ku qabto maqalka ama aragga
- aad uwalwalsan tahay, murugaysan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- aad dareento inaanad ammaan ahayn ama aad ka baqayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto
- xubnaha qoyskaagu u baahan yihiin kaalmo.



## WAA MAXAY QIIMEYNTA WAXA UGU WANAAGSAN EE LAGUU QABAN KARO?



Waa hawl halkaas oo aad arki karto shaqaalaha kale [*sida dhakhaatiir ,caawiye bulsho ama dhakhtarka maanka*] yaa ku weydiin kara su'aalaha si uu:

- u fahmo **baahiyahaaga**
- u go'aamiyo **taageerada** aad u baahan tahay.

Tani waxay ka caawin doontaa masuuliyiinta inay gaadhaan go'aanno muhiim ah, tusaale ahaan halka adiga iyo qoyskaaga aad degi doontaan.

Waad aamini kartaa kalkaaliyaha, dhakhtarka iyo shaqaalaha. Waxaad la wadaagi kartaa wax walba. Wax kasta oo aad sheegto lalama wadaagi doono cid kale marka laga reebo waalidkaa adigoon oggolaansho bixin. Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

Haddii aadan rabin in waalidkaa lagu wargeliyo ama ay ku lug yeeshaan, u sheeg shaqaalaha. Waxay baadhi doonaan codsigaaga waxayna go'aamin doonaa waxa kugu habboon.

## XUQUUQDA WAXBARASHO



Ka ilmo ahaan waxaad xaq u leedahay waxbarasho iyo inaad wax dhigato. Haddii aad tagto dugsiga oo aad buuxiso 18 sano inta aad dhiganayso, waad sii wadan kartaa ilaa waxbarashadu kuu dhammaato.

Shaqaalaha ayaa kaa caawin doona adiga iyo qoyskaaga inaad iska diwaangalisaan dugsi maxali ah. Waxay kugu wargelin doonaan fasallada diyaarinta luuqadda iyo koorsooyinka kale. Waxa laga yaabaa inaad ka qeybgasho qaar kamid ah koorsooyinkaan.

Shaqaaluhu waxay ku sheegi doonaan hawlaha waxbarasho iyo madadaalo si ay kaaga caawiyaan inaad barato, horumariso naftaada, isla markaana saaxiibo cusub sameysato.

## XUQUUQDA SHAQO





Iyadoo ku xidhan da'daada iyo xaaladdaada, waxaa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad ka shaqeyso Itaalia, haddii aad rabto. Shaqaalaha xaruuntasoo dhoweenta ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah.



Dhammaan wiilasha iyo gabdhaha ku jira 16 sanno j looma ogola inay shaqeeyaan.

## DHUKUMANTIGAAGA MAGANGELYO-DOONKA



Waxaad heli doontaa dhokumanti gaar ah oo uu ku jiro magacaaga iyo sawirkaaga. / Waalidkaagu waxay heli doonaan dhokumanti gaar ah oo ay ku jiraan magacaaga iyo sawirkaaga.

Tani waxay muujinaysaa inaad magangalyo raadiye ka tahay wadankan. Waa inaad had iyo jeer sidataa.

Dhukumantigaan waa muhiim, ka taxaddar inaadan lumin oo ha siin qof kale.

Dhokumantiga waxa loogu yeedhaa [permesso di soggiorno].

## HALKEE AYAAD ADIGA IYO QOYSKAAGUBA JOOGI DOONTAAN?

Meesha aad deganaandoontaan inta maamulku baadhayaan codsigiinna magangelyo waxay ku xidhan tahay xaaladdiinna.



Shaqaalaha ayaa idinku wargalin doona **halka aad dhammaantiin joogi doontaan**, tusaale ahaan hoy, magaalo ama gobol gaar ah.

Tani waxay ku xidhnaan kartaa goobaha la heli karo ama baahiyaha qoyskaaga.

Haddii qoyskaagu rabo inuu ka baxo goobta hoyga ama uu magaalada/degmada kamaqnaado muddo gaaban, waa inay ka codsadaan oggolaanshaha maamulka.

**Adiga iyo qoyskaaguba waxaa laga yaabaa  inaad heshaan taageero iyo adeegyo kaliya marka aad degtaan goobta ay go'aamiyeen maamulku.**

Marar aad u yar, waxaa dhici karta in qoysaska la dejiyo xarun aysan si xor ah uga bixi karin ama ugu laaban karin sida ay doonaan. Haddii aad ku sugan tihiin xaaladdan, lataliye sharci iyo shaqaaluhu way idin caawin doonaan.

**Meel kasta oo aaddeggan tihiin, waxaad xaq u leedihiin inaad heshaan:**




- **la joog qoyskaaga**



- **Hel caawimaad si aad u raadiso xubnaha qoyskaaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan.**

**Waxaad xaq u leedahay inaad badqabto. Qofna looma ogola inuu:**







| | | |
|---|---|---|
| ku cabsi galiyo | ku caayo | ku dhibaateeyo |

Ha noqoto cidday doonaan, qof aad garanayso iyo mid aanad garanaynba.


Haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto waalidka ama shaqaalaha, waad hadli kartaa oo codkaaga dhiiban kartaa.

## MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDII QOF SI XUN KUULA DHAQMO?



Waxaad la hadli kartaa qof aad ku kalsoontahay, xubin qoyskaaga ka tirsan, shaqaalaha xaruunta soo dhoweenta.

Haddii qof si xun idiinla dhaqmo, waxaad ka dacwayn kartaan maamulka amniga si looga horgtago inay marlabaad dhacdo. Tan waxa loo yaqaanaa 'samaynta cabasho'.



**Fiiro gaar ah!**
Haddii aad ku sugan tahay goob ka baxsan meesha aad degan tahay oo aad khatar ku jirto, waxaad wici kartaa lambarka gargaarka degdegga ee heer qaran ee bilaashka ah 112  taleefan kasta.

## WAA MAXAY WAAJIBAADKA ADIGA IYO QOYSKAAGU LA IDINKA RABO MARKAAD HESHAAN SOO DHAWAYN?

Waa muhiim inaad sheegto runta oo aad la shaqeyso maamulka, xitaa haddii mararka qaar ay cabsi iyo dhibaato kugu noqoto inaad sheekadaada sheegto.

Shaqaaluhu way ku caawin karaan haddii ay ogyihiin xaaladaada.



Meel kasta oo aad adiga iyo qoyskaagu ku sugan tihiin, waxa jira sharciyo la raaco. Tusaale ahaan, Idinku waa inaad ixtiraamtaan dadka kale ee degan iyo shaqaalaha, sidoo kale waa inaad aamustaan inta lagu jiro saacadaha kala huradada maamulka xaruunta ayaa idiin sheegidoono.

Shaqaaluhu waxay sharraxi doonaan xeerarka iyo cawaaqibta ka dhalanaysa marka xeerarka la raaci waayo.

Waa muhiim in adiga iyo qoyskaaguba:

- ✔ raacdaan xeerarka goobta aad joogi doontaan
- ✖ haka baxsan goobta ay maamulku idiin sheegeen inaad joogtaan
- ✔ raaca shuruucda dalkan, oo shaqaaluhu idiin sharixi doonaan.

## MAXAA DHACAYA HADDII ADIGA IYO QOYSKAAGU AYDIN U HOGAANSAMI WAYDAAN WAAJIBAADYADIINNA?



Haddii ay tani dhacdo, waxaad si furan ula hadli kartaan shaqaalah xaruunta soo dhoweenta oo u sharaxa xaaladiina iyo sababaha aad u sheegaysaan.

Maamulku waxay qiimeyn doonaan xaaladda waxayna wargelin doonaan waalidkaa haddii ay go'aansadaan inay qaadaan tallaabooyin.



Tusaale ahaan, haddii xubin qoyskaaga ka mid ah uu ka baxo goobta hoyga, magaaalada, ama degmada ay maamulku go'aamiyeen in qoyskaga la dejiyo, **xubintaas qoyska waxaa laga yaabaa inay hesho taageero ka yar intii hore**.



Haddii xubin ka mid ah qoyskaaga uu dhaqmo si rabshad leh, **xubintaas qoyska waxaa laga yaabaa inay lumiyaan taageerada ay helayaan.** Booliska ayaa la wici karaa.

Adiga iyo qoyskaaga waxaad hadda ku sugan tihiin **[itaalia...]**, **kasoo ah waddan katirsan EU+.**
**Waddamada EU+ waa:**

- 27 Dal ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## XEERARKA KU SAABSAN CODSASHADA ILAALINTA CAALAMIGA AH IYO U SAFARKA WADDAMADA EU+

**Shaqaalaha** xaruunta soo dhoweenta **waxay kuu sharixi doonaan sharciyadan muhiimka ah adiga iyo qoyskaaga. Waxaad weydiin kartaan iyaga su'aalo wakhti kasta.**



- Adiga iyo qoyskaagu waa inaad joogtaan [...itaalia] oo waa inaanad u baxsan mid kamid ah waddamada EU+.

- Haddii uu qoyskaagu ku sugan yahay mid ka mid ah waddamadan, maamulku waxay idiin sheegi doonaan xuquuqdiinna ku saabsan isu keenista qoyska. Haka iska baxsan uun.

  Waxaa laga yaabaa inaad ka fikirtaan ka bixitaanka dalkaas ama qaar ka mid ah dadka ayaa isku dayi doona inay idinku qanciyaan inaad ka carartaan. Tani waxay noqon kartaa mid khatar idinku ah. Adiga iyo qoyskaagu waxaad la hadli kartaan shaqaalaha xaruunta soo dhoweenta oo kuu sharixi doona xaaladda. Shaqaalaha xaruunta ayaa idinla tallin doona.


- Haddii aad baxsataan, waxay jiri doontaa cawaaqib xun, kuwaas oo lagu sharaxay buug-yarahan. Tusaale ahaan, waxaad ka heli doontaan taageero yar oo soo-dhawayn ah wadanka kale.

- Xasuusnow, waa inaad ka diiwaangelisaan codsigiina magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timaadeen, haddii maamulku aanu idiin sheegin wax kale.

- Kaliya mid kamid ah waddamadan ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigiina magangalyo. Maamulka talaiaaniga ayaa idiin sheegi doona wadanka arrintan ka masuulka ah.

Waxaad ku baran doontaan habraacyadan buug-yarayaal gooni ah.

## MAXAA DHACAYA HADDII ADIGA IYO QOYSKAAGA AAD U BAXSATAAN MID KA MID AH WADDAMADA KALE?




**Gudaha Itaalia** Habraaciina magangalyo doonka waa la joojin doonaa.

**Inta aad joogtaan wadanka kale ee EU+ ah:**

- Maamulku waxay go'aansan karaan inay idinku celiyaan wadanka EU+ ee aad kasoo tagteen.

Laga bilaabo marka maamulku idinku wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaan xuquuqo qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli doontaan noocyo kamid ah taageerada oo
- laguuma ogolaan doono inaad shaqayso.

## YAA IDIN CAAWIN KARA ADIGA IYO QOYSKAAGA HADDII AYNDAAN KU QANACSANAYN GO'AANKA AY GAREEN MAAMULKU?



Waxaad caawimo weydiisan kartaan lataliyaha sharci. Lataliye sharci waa qof yaqaan shuruucda dalkaas, kaasoo daraasayn kara xaaladdiinna oo idinka caawin kara.

Shaqaaluhu waxay idiin sheegi doonaan ururada aan dawliga ahayn kuwaasoo sidoo kale ku siin kara macluumaad iyo caawimaad.




Waxaad la xidhiidhi kartaan Hay’adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) wakhti kasta. UNHCR waxay ilaalisaa dadka lagu qasbay inay ka tagaan dalkooda.

## MAXAA DHACA HADDII QAAR KA MID AH TAAGEERADA LA BEDDELO?

Haddii maamulku prefatuurad go’aamiyaan inay xaddidaan ama joojiyaan noocyo ka mid ah taageerada uu qoyska helayo sabab la xidhiidha xaalad sida lagu sharaxay bogga [13...] maamulka *ayaa habaynaysa* xubintaa qoyska ka tirsan wali way helaysaa caawimada ku salaysan xaalada shaqsiga ah iyo baahiyaha jira. Wali wuxuu helayaa inuu awood u yeesho inuu la kulmo dhakhtar ama kalkaaliye, inuu helo kaalmo caafimaad, waxoogaa taageero ah maamulka xaruunta *waxay ku dari tusaale,sida cunto*] iyo goob uu seexdo oo ay go'aamiyeen maamulku.



Marka maamulku go’aansadaan inay joojiyaan taageerada soo dhawaynta ee adiga iyo qoyskaaga la siinayay sababtoo ah aad u baxsateen waddan kale oo EU+ ah, nooca taageerada aad heli doontaan weli waxay ku xidhnaan doontaa xaaladdiinna iyo baahiyihiina.

Wali waxaad awood u lahaan doontaa inaad tagto dugsi.

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025